



# College Bound Khuraafaadyo & Xaqiiqooyin

## Khuraafaad

College Bound waa deeq wax-barasho oo dhamaystiran.



## Xaqiiq

College Bound ma dabooli doonto *dhamaan* laakiin deeqdan waxbarasho waxay ku saleysan lacagta wax dhigashada (lacagaha koolejka dawliga ah), kharashaadyada qaar, iyo lacag yar oo buugaagta ah. Waxay bixin karaan cuntada iyo jiifka hadii nooc kale oo deeq maaliyadeed ahi ay daboosho lacagta wax dhigashada.

## Khuraafaad

Hadii aan helo College Bound, ma heli doono nooc kale oo deeq maaliyadeed ah.



## Xaqiiq

Waxaad heli kartaa deeqaha maaliyadeed ee kale marka lagu daro College Bound. Marka aad xareyso codsiga deeqda maaliyadeed (FAFSA ama WASFA), waxaad ogaan doontaa inaad u qalanto helida lacag koolej oo dheeri ah.

## Khuraafaad

Hadii aan is-diwaangaliyo College Bound, waxaan si otomaatig ah u heli doonaa deeqaha.



## Xaqiiq

Isdiwaangalinta College Bound waa tallaabada koowaad. Wuxuu kaa doontaa inaad oofiso Ballan-qaadka College Bound iyo buuxiso shuruudaha u qalmitaanka iskuulka sare. Kadib waad heli doontaa deeqda!

## Khuraafaad

Hadii aanan u qalmin deeqda maaliyadeed ee federaalka, ma heli karo College Bound.



## Xaqiiq

College Bound waa barnaamijka deeqda maaliyadeed ee gobolka ee loogu talo-galay ardayda Washington. Ilaa aad ka buuxiso shuruudaha deganaanshaha gobolka iyo barnaamijka, waad heli kartaa College Bound - kaliya xareyso WASFA halkii aad ka xareyn lahayd FAFSA.

## Khuraafaad

College Bound kaliya waxaa loo isticmaali karaa hal degree.



## Xaqiiq

Ardaydu waxay awood u leeyihii inay bed-bedeli karaan sida ay u isticmaalayaan deeqdan waxbarasho, waxay ku kasban karaan wax ka badan hal degree - iyagoo heli kara associate degree kahor inta aanay dhamayn bachelor degree-ga. Shahaadada bachelor degree-gu waa mida u sarreysa ee uu ardaygu heli karo isaga/iyada oo isticmaalaysa/ya College Bound.

